



Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad

Documentiga Kulankii 22aad

Taariikhda: 05/05/2014

Kalfadhiga 4aad

Kulankiisii 22aad

Saacada la furay: 11:15 am

Saacada la xiray: 11:35 am

Guntanka: 141 xildhibaan

Ajendaha

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Akhrinta soo jeedinta wax ka bedalka Xeer-Hoosadka**
- 4. Dooda Hishiiskii Shirkadda Favori**

Shir-Guddoonka: Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Baarlamaanka

Mudane Jeylaani Nuur Iikar

Waxaa shirka Furey Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Baarlamaanka Mudane Jeylani Nuur Iikar, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir, Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada uu weydistey in ay ansixiyan ajendaha weyna ansixiyeen.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa u yeerey Xog'hayaha Guddiga Xeer-Hoosadka si uu Golaha ugu hor akhriyo Guddiga shaqadii ay soo qabteen.

Xildhibaan Maxamed Cumar Maclow, Xog'hayaha guddiga Xeer-Hoosadk

Wuxuu Golaha Baarlamaanka ka hor Akhriyey Guddiga wax yaabihii ay ka be-
deleen xeer-hoosadk iyo wax yaabihii ay ku soo dareen.

Guddoomiyaha ayaa sheegey, intaasi waxey noogu egtahay Akhrintii uu inoo
Akhriyey Xog'hayaha guddiga xeer-hoosadka ,sida ay wax ugu badaleen iyo
wixii ay ku soo dareenba.

Intaa ka dib, Guddoomiyaha ayaa u yeerey, Guddiga Gaadiidka Garoomada
Dekadaha Wadooyinka Howlaha Guud iyo Tamarta.

Xildhibaan Cali Nuur Xuseen, Xubun Guddiga, wuxuu soo jeediyey, in ay
manta suurta gal ahayn in laga doodo Hishiiska Shirkadda Favori, waxa uu
codsadey in dib loogu dhigo.

Guddoomiyaha iyo Xildhibaanada wey ogolaadeen codsiga uu soo jeediyey,
Xildhibaan: Cali Nuur Xuseen, isagoo ka mid ah xubnaha Guddiga.

Intaa ka dib, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey, kooramka markii hore ee la
ii soo gudbiyey waxa uu ahaa **141 xildhibaan**, hada markii la tiriyey waxey
Noqdeen 68 **xildhibaan**.

**Shir Guddoonka, Guddoomiye ku xigeenka 1aadee Golaha shacabka,
MudaneJeylani Nuur Ilikar, oo shir Guddoominayey, kalfadhiga 4aad
kulankiisa 22aad ayaa sheegey in uu shirka xiran yahay saacada markey
ahayd 11:3 am.**